



# Ha moogaanin! Ka faa'iidayso KAREDIT-KA CARRUURTA IYO QOYSASKA SHAQEeya!

Xitaa haddii aadan waajib kugu ahayn in aad xarayso canshuuraha dakhliga ee Minnesota, weli waad dalban kartaa faa'iidooyinka canshuurta ee qiimaha leh. Karedidka Qoysaska Shaqeeeya iyo Karedidka Carruurta waxay bixiyaan dhimista canshuurta dadka dakhligoodu ka hooseeyo heer go'an. Labada Karedidka waa la soo celin karaa (refundable), taasoo la micno ah in aad heli karto soo celin xitaa haddii aadan wax canshuur ah bixin.

## Bixinta Hore ee Karedidka Canshuurta Carruurta

Laga bilaabo sannadka canshuurta 2024, waxaad dooran kartaa inaad hesho qayb ka mid ah Karedidka Canshuurta Carruurta ee sannadka xiga iyada oo loo maro saddex bixino hore kahor intaadan gudbin canshuurtaada sannadlaha ah. Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, booqo [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) oo ku qor **Advance Payments** sanduuqa raadinta.

## Waa maxay Karedidka Canshuurta Carruurta?

Karedidka Canshuurta Carruurta waxaa heli kara dadka reer Minnesota ee leh carruur ka yar 18 sano. Haddii aad gudbiso canshuurta Minnesota, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto \$1,750 halkii ilmo iyadoo aan xadidnayn tirada carruurta aad heysato.

## Waa maxay Karedidka Qoysaska Shaqeeeya?

Karedidka Qoysaska Shaqeeeya waxaa heli kara dadka reer Minnesota ee sanadkii dakhli kasbaday. Karedidka ugu badan ee Qoysaska Shaqeeeya waa \$350 haddii dakhligu yahay \$8,750 ama ka badan. Waxaana suurtagal ah in uu kordho iyadoo lagu saleynayo qodob kale.

- \$350 Haddii aadan lahayn ilmo u qalma
- \$1,275 Haddii aad leedahay hal ilmo oo 18 jir ama ka weyn
- \$2,450 Haddii aad leedahay laba carruur ah oo 18 jir ama ka weyn
- \$2,850 Haddii aad leedahay saddex ama ka badan carruur ah oo 18 jir ama ka weyn

Labada Karedidka Canshuurta Carruurta iyo Karedidka Qoysaska Shaqeeeya waxay hoos u dhacaan haddii dakhligu dhaafdo heerarka soo socda: \$36,880 haddii aad tahay lamaane is qaba oo si wadajir ah u gudbinaya ama \$31,090 haddii aad tahay qof kale oo canshuur gudbinaya (Karedidka waxaa hoos loo dhigi doonaa 12% dakhligii aad kasbatay ama wadarta guud ee dakhligii la hagaajiyay (AGI), midka sareeya labadooda.

## Sideen u dalban karaa Karedidka?

Sanadaha canshuurta 2022 iyo ka hor, si aad u dalbato Karedidka Qoysaska Shaqeeeya, isticmaal Schedule M1WFC, *Working Family Credit*. Karedidka Canshuurta Carruurta lama heli karo ilaa sanadka canshuurta 2023.

Si aad u dalbato labadaba Karedidka Canshuurta Carruurta iyo Karedidka Qoysaska Shaqeeeya, isticmaal Schedule M1CWFC, *Minnesota Child iyo Working Family Credits*, kaas oo laga heli doono xilliga xiga ee gudbinta canshuuraha.

## Diyaarinta Canshuurta Bilaashka ah

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto bixinta adeegyada diyaarinta canshuurta ee bilaashka ah! Booqo [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) ku qor **free tax preparation** sanduuqa raadinta si aad u hesho adeegyada diyaarinta canshuurta ee bilaashka ah ee kugu dhow.